جمعية خدمة المحتوى
الإسلامي باللغات

ANIGU WAXAAN AHAY MUSLIM

أَنَا مُسْلِمٌ | صومالي | Soomaali

Gudiga Cilmiga ah ee Jimciyadda Turjumida
Maaddooyinka Islaamiga ah ee Afafka kala duwana

أَنَا مُسْلِمٌ

ANIGU WAXAAN AHAY MUSLIM

اللَّجْنَةُ العِلْمِيَّةُ
بِجَمْعِيَّةِ خِدْمَةِ المُحْتَوَى الإِسْلَامِيِّ بِاللُّغَاتِ

Gudiga Cilmiga ah ee Jimciyadda Turjumida Maaddooyinka Islaamiga ah ee Afafka kala duwana

بِسْمِ اللهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

ANIGU WAXAAN AHAY MUSLIM[1]

ANIGU WAXAAN AHAY MUSLIM (MID HOGGAANSAMAY), Taasi macneheedu waa in diintaydu ay tahay Islaam. Islaamku waa odhaah wayn oo nadiif ah Nabiyadii ay iska dhaxleen nabadgelyo korkooda ha ahaatee, laga soo bilaabo midkii ugu horreeyey ilaa iyo kii ugu dambeeyey, odhaahdani waxay xambaarsan tahay macnayaal sarreeya iyo qiyam wayn, macneheedu waxa uu yahay: Isdhiibid, hoggaansami iyo ka amar qaadashaddda Allaha na abuuray, macnaha kale ee weedha As-salaam u xambaarsan tahay dadka dhammaan, wadar iyo waaxidba ayaa ah: nabad, ammaansiin, liibaan iyo degganaan.

Sidaa darteed ayey noqotay odhaahda nabadda iyo hoggaansanaantu, kuwa ugu badan ee kusoo arooray shareecada Islaamka dhaxdeeda, As-salaam waa magac kamid ah magacyadda Alle, waana salaanta ay muslimiintu dhexdooda isku salaamaan, waana

[1] WAA ORAAH LOO QORAY IN LAGU QEEXO OO LAGUCADDEEYO ISLAAMKA.

salaanta Ahlu Jannaha, Muslimku dhab ahaan waa ruuxa ay ka nabad galaan muslimiintu carrabkiisa iyo gacantiisaba, Islaamku waa diin khayr u leh dadka dhammaantood, oo deeqda dhammaan, waana jidka liibaantooda adduun iyo aakhirabba. Sidaa darteed ayuu Islaamku yimid isaga oo soo xiray diimihii isaga ka horreeyey kulminayana wax kasta oo maslaxada aadamaha ah adduun iyo aakhiraba, una furan ruux waliba, isaga oo aan kala soocaynin dadka xagga dhalashada iyo xagga midabkaba, iskabadaa taase hal il ayuu dadka oo dhan ku fiirinayaa, Qofna diinta Islaamka dhexdeeda kama fiicnaado dadka kale oon ka ahayn kolba inta uu diinta Islaamka ka yaqaan ee uu ku dhaqmaayo.

Sidaa darteed ayey ku raalli noqonaysaa naf waliba oo toosan, sababtoo ah kama hor imanayo Fitradda (abuurka toosan) iyo caqliga toosan. Ruux waliba waxaa la dhalaa isaga oo ay abuur u tahay Fitrada wanaagsan, caddaaladd, xornimo, jecelna Rabbigiisa, qirayana in uu yahay midka keligii lacaabudo, ee muteystay cibaaddo cid kale ay la wadaagin, kamana leexdo ruuxna Fitradaa toosan ee wanaagsan, in wax ka leexiya lasoo darso mooyaane, Diintani waxaa dadka uga raalli noqday Ilaahii abuuray ee Rabbigooda

iyo midka ay caabudaan ahaa.

Diinteyda Islaamka waxay ibarasaa in aan aduunka ku noolahay maanta, barrina aan u guuri doono guriga aakhiro, oo ah meesha ay ku nagaan doonaan aadamuhu dhammaantood, masiirkooguna ahaan doono Janno ama Naar .

Diinteyda Islaamku waxay ifaraysaa amarro waxna way iga reebaysaa, haddii aan waxyaabaha la ifaray la'imaado kana fogaado waxyaabaha layga reebay adduun iyo aakhiraba waan ku liibaanayaa, haddiise aan xad gudbo ama aan ka gaabiyo, waa halaag aduun iyo aakhiraba kolba inta aan xadgub bay iyo inta aan ka gaabiyeyba,

Waxa ugu wayn ee uu islaamku i farayna waa Tawxiidka Alle, oo ah inaan Alle wayne keligii aan caabudo, Anigu waxa aan qirayaa qalbigana ka rumaynayaa rumayn go'an in Alle uu yahay midka i abuuray iyo midka aan caabudayo, mana caabudayo cid aan Alle ahayn, waxaanna u caabudayaa Alle jacayl aan jeclahay, iyo cabsi aan ka cabsannayo cadaabtiisa, ama rajayn aan rajaynayo abaal marintiisa, iyo talo saarasho aan talo saarannayo darteed uun, Tawxiidkaasi waxa uu ku joogaa: Alle oo loo qiro kelinnimo, iyo Nabigiisa Muxammed naxariis iyo

nabadgelyo korkiisa ha ahaatee in lala soo diray Risaalada. Muxammed waa nabiga Nabiyada lagu gunaanaday, Alle ayaa soo diray isagoo naxariis u ah uunka oo dhan, laguna soo gunaanaday nabinimada, mana jiro nabi ka dambeeya, wuxuuna la yimid Muxammed diin ku socota guud ahaan ummadaha, oo u suubbanta goor iyo goob waliba iyo ummad kasta,

Diintaydu waxa ay i faraysaa si go'an in aan malaa'igta rumeeyo, iyo dhammaan Rususha Alle soo diray oo dhan, uuna ugu horreeyo Nuux, Ibraahim, Muuse, Ciise iyo Muxamed, naxariis iyo nabadi korkoode.

waxa kale oo ay i faraysaa in aan rumeeyo dhammaan kutubta uu Alle rususha kusoo dejiyey, oo midka u dambeeya ee lagu soo gunaanadayna aan raaco, kaa soo ah midka ugu wayn, waana Qura'aanka kariimka ah.

Diinteydu waxay ifaraysaa in aan maalinta aakhiro ee dambaysa rumeeyo, maalintaas oo dadka lagu abaal marin doono wixii ay faleen, waxaa kale oo ay ifaraysaa diinteydu: In aan rumeeyo Qaddarka, raallina ku noqdo waxa isoo gaadha nolosha adduunyo dhexdeeda khayr iyo shar, iyo in aan ku dadaalo qaaddashada waxyaabaha lagu badbaado.

Rumaynta Qaddarka Alle waxa uu i siinayaa raaxo, xasillooni, adkaysi iyo in aan ka qoomammoon wixii tegay, sababtoo ah waxa aan si dhab ah u ogahay in waxa igu dhaca uusan i gafeyn, waxa i gafayana uusan igu dheceen, wax waliba waa la qaddaray oo laga qoray xaga Alle, midda aniga i saaranina waa inaan qaato sababta, iyo in aan raalli ku noqdo wixii isoo gaadha, mar haddaan qaatay sababihii la iga rabay in aan sameeyo,

Islaamku waxa uu ifarayaa ficillada wanaagasan ee ruuxdayda nadiifinaya, iyo akhlaaqda wayn ee rabbigay raalli galisa, qalbigaygana farxad galisa, laabtaydana wanaajisa, wadadaydana ifisa, igana yeesha ruux anfaca bulshada.

Camalladaas waxaa ugu wayn: Tawxiidka ilaahay, salaadaha shanta ah oo la oogo habeen iyo maalin, gudashada Sakadda maalka, in la soomo bisha Ramadaan, iyo in loo qasdo kacbada xurmada leh, ee Makka ku taalla, ruuxii awooda xajkaas,

Waxyaabaha diintaydu itustay kuwa ugu waa wayn waxa kamid ah in waxa laabta waasiciya ay ka mid tahay quraan akhriska badan kaasoo ah hadalka ilaahay, uguna run sheegga badan, uguna quruxsan uguna wayn, ugu baaxadda wayn oo kulminaya kuwii

hore iyo kuwii dambe cilmigooda, Qur'aanka akhrintiisa ama dhegaysigiisa waxa uu gelinayaa qalbiga xasillooni degganaan iyo liibaan, haba ahaado qofka akhrinaya ama dhegaysanaya mid aanan af carabiga aqoonin amaba aan muslim ahne.

Waxa ugu wayn ee laabta dajiya waxaa kamid ah baryada Alle oo labadiyo, iyo isagoo la magan galo, lana waydiisto waxyar iyo wax waynba, Alle wuu aqbalaa ruuxii barya oo cibaadadana u kali yeela.

Camallada kale ee laabta farxad geliya waxa ka mid ah xuska Alle -korreeyee- oo labadiyo.

Nabigaygu -naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee- waxa uu igu hanooniyey habka iyo qaabka ugu wanaagsan ee Alle loo xuso, iyo waxa ugu wanaagsan ee lagu xuso, waxaa ka mid ah ereyada afarta ah, ee hadal ahaanna ugu fadliga badan, Qur'aanka ka dib: (Subxaanallaah, Alxamdulillaah, laa'ilaaha illa laah, Allaahu Akbar) oo macnahoodu yahay: Alle ayaa nusqaan oo dhan ka hufan, mahad oo dhanna iskaleh, Alle xaq lagu caabudo majiro oo aan Alle ahayn, waana Allaha waxkasta kawayn.

waxa kale oo kamid ah dikrigaas: (Astaqfirrullaah, Walaaxawla walaa Quwata Ilaa billaah) oo macnahooddu yahay: Alle ayaan dambi dhaaf

waydiisanayaa, mana lihin xeelad iyo awood toona, Alle tiisa mooyee.

Ereyaddaas koobani waxay ku leeyihiin laabta saamayn cajiib le, taasoo ah:farxadda quluubta, iyo in xasillooni ku soo degto laabta.

Islaamku waxa uu ifarayaa in aan ahaado mid sharafkiisu Sarreeyo kana fog wax waloo hoos u dhigaya banii aadam Nimadayda iyo karaamadayda, una adeegsado caqligayga iyo xubnahayga wixii loo abuuray ee camal wanaagsan ah xagga diintayda iyo adduunyadayda.

islaamku waxuu ifarayaa naxariista, dabeeco wanaagga, dhaqanka wanaagsan, iyo in aan usamo falo inta uu Alle abuuray wixii aan awoodo odhaah ahaan iyo addin ahaanba.

Xuquuqda ugu wayn ee la ifaray dhanka aadamaha: Waa midda ay igu leeyihiin waalidiintaydu, xaqooda diintu waxay ifaraysaa in aan baarri u ahaado waalidkay, khayrka aan la jeclaado, kuna dadaalo sidii ay u liibaani lahaayeen adduun iyo aakhiraba, iyo in aan wixii dheef ah iyaga u hormariyo gaar ahaan markay waynaadaan, Sidaa darteed waxa aad arkaysaa hooyo iyo aabbe bulshooyinka muslimka ah dhexdooda in ay joogaan darajo sare oo waynayn iyo

maamuusid ah, iyo u adeegidda dhanka caruurtooda ah, mar waliba oo labada waalid ay waynaadaan xaga da'da, ama ay xanuusadaan, ama taagdarro qabato waxa kordhaya baarinimada ay u qabaan caruurtu labdooda.

Diintayda ayaa ibartay in ay haweenku leeyihiin maamuus sare iyo xuquuq wayn, dumarku islaamka dhexdiisa waa ragga oo kale waxyaabo qaar oo ay ku kala duwanyihiin maahane, dadka midka ugu fiicanina waa kan reerkiisa ugu fiican, gabadha muslimadda ahi yaraanteeda waxa ay leedahay xaqa nuugmada, ilaalinta iyo barbaarinta, iyo in si fiican loo tarbiyeeyo, iyaduna waqtigaas waa ilqabowsi, waana midhaha qalbiga waalidiinteeda iyo walaaleheeda.

Marka ay waynaatana waa mid la sharfay oo la maamuusay taasoo uu ka maseerayo waligeedu oo ku haraynaya ilaalintiisa, Raalli kama noqonayo in ay soo gaarto gacan xun, carrab dhiba iyo ilkhiyaamo intaba.

Marka ay guursatana waxa ay ku guursatay odhaahda Alle iyo ballankiisa adag, waxa ayna ahaanaysaa guriga ninkeeda daris midka ugu sharaf badan, oo ay waajib ku tahay ninkeeda in uu maamuuso, una sama falo, dhibkana in uu ka dhawro.

Marka ay hooyo noqotana sama falkeedu waxa uu

noqonayaa mid la xiriira xaqa Alle caasinimadeeduna mid la xiriirta Alle oo cibaadadiisa wax lala wadaajiyo, iyo dhulka oo la fasahaadiyo.

Marka ay walaal tahayna waa tii muslimka lafaray in uu xiriiriyo, uuna maamuuso, una masayro ilaalinteeda, marka ay habaryar tahayna waxa ay noqonaysaa booskii hooyada xagga samafalka iyo xiriirinteeda.

Hadii ay ayeeyo tahayna ama mid waayeel ah xagga da,a da qiimaha ay leedahay waa uu kordhayaa caruurteeda aktooda ah, iyo kuwa ay ayeeyada utahay, iyo qaraabadeeda oo dhan, ma dhacayso markaa in ay codsi ka diidaan, ama taladeeda xumeeyaan.

marka ay tahay mid ka fog dadka oo qaraabo aysan lahayna ama daris waxa ay leedahay xaqii islaanimada ee guud oo ah dhibkoo laga celiyo, indhaha oo laga laabto iyo wixii lamid ah.

Kama zuulin bulshooyinka muslimiinta inay ilaaliyaan xuquuqdaas si dhab ah, kaasoo ka dhigay haweeneyda mid mudan qiimo iyo fiiro gaar ah oo aan laga heleyn bulshooyinka aan muslimka ahayn.

Intaa kaddib gabadhu waxa ay leedahay Islaamka dhexdiisa in ay wax hanti karto, kiraysan karto, gadi karto, soona gadan karto, iyo inta kasoo hartay

hishiisyada, waxa kale oo ay leedahay in ay wax barato waxna ay barto, iyo shaqo, wixii aan diinteeda ka hor imaanayn, iskaba daa taase cilmiga waxaa ka mid ah wax qof kasta laga rabo oo uu ku dambaabayo haddii uu isaga tago rag iyo dumarba ha ahaadeene.

iskaba daa taase waxa ay leedahay waxa ay ragu leeyihiin wax ay gaar latahay ragga kasokow maahane, ama iyagu ay gaar la yihiin dumarka kasokow oo xuquuq ah taasoo munaasib u ah labadaba sida lagu faafaahiyay meelaheeda.

Diintaydu waxay iifaraysaa in aan jeclaado walaalahay rag iyo dumarba iyo in aan jeclaado adeeraday, Edddoyaashay, Abtiyaalladay, habaryarahay, iyo qaraabada oo dhan in aan jeclaado, waxa uu ifarayaa in aan u istaago xuquuqda xaaskayga iyo caruurtayda iyo dariskayga.

Diintaydu waxay ifaraysaa in aan waxbarto, waxayna igu boorinaysaa wax waliba oo kor u qaadaya caqligayga, dabeecadayda iyo fikirkayga.

Waxa kale oo ay ifaraysaa xishood, dul qaad, wax bixin, geesinnimo. wax waliba booskoodii in aan dhigo, degganaan, adkaysi, ammaano, isdhul dhigid, dhoowrsanaan, toosnaan, ballan oofin, wanaag in aan la jeclaado dadka, in aan shaqaysto, oon tacabkayga

cuno iyo in aan u turo masaakiinta, in aan booqdo kuwa xanuusan, ballamada fuliyo, hadal wanaagsan ku hadlo, dadkana aan la hor tego fur furnaan, iyo in aan ku dadaalo ka farxinta dadka intii aan awoodo.

taa baddalkeed islaamku waxa uu iiga digayaa jaahilnimo, waxaana uu iga reebayaa gaalnimo, Alle caasi, xumaan galmo xaaraan ah, kibir, xasad nimo, malaha xun, baasaysiga, murugada, beenta, quusashada, gacan adayga, wahsiga, fulaynimada, baaga muudada(shaqo la.aanta) cadhada, xad gudubka, doqonniimo, dadka oo la xumeeyo, hadal aa qiimo lahayn, sirta oo lafaafiyo, khiyaamada ballamaha oo laga baxo, waalidka oo lacaasiyo, qaraabada oo lagooyo, oowlaadda oo ladayaco, dariska oo ladhibo iyo dhamaan inta uu alle abuuray.

Sidoo kale Islaamku waxa uu iga reebayaa in aan cabbo waxyaabaha maanka dooriya, iyo xoolaha oo lagu qammaaro oo lagu ciyaaro, xatooyada, qishka, dhagarta, dadka oo argagax lagu furo, jaasuusnimada iyo ceebaha dadka oo la raacraaco.

islaamku xoolaha ayuu ilaalinayaa, taasna waxa ku jirta faafin la faafiyo nabad gelyada iyo amniga, sidaa darteed islaamku waxa uu ku boorriyay ilaalinta ammaanada, wuuna ammaanay dadka ammaanada

ilaaliya, waxaana uu u ballan qaaday nolol wanaagsan, iyo jannada aakhiro, waxaana uu islaamku diiday xatooyada, waxaana uu ugu goodiyey ruuxa sidaa sameeya ciqaab aduun iyo aakhiraba.

Diintayda islaamku waxay ilaalinaysaa naf waliba, sidaa darteed waxa uu xaaraan ka dhigay nafta in ladilo iyadoo aan mudnayn, iyo in lagu xad gudbo dadka kale nooc waliba oo uu yahay xad gudubku hadduu rabo ha ahaado oraahe.

iskaba daa taase islaamku waxa uu diiday in uu qofku ku xad gudbo naftiisa, umanna banaynin in uu caqligiisa ku ciyaaro, ama uu baa'bi'iyo caafimaadkiisa, ama uu dillo naftiisa.

Diintayda Islaamka waxay ii dammaanad qaadday xorriyad ku dhisan sharciga: Ruuxa diinta Islaamka dhexdeeda waa mid xor u ah fikirkiisa, iibkiisa, soo gadashadiisa, ganacsigiisa, rarashadiisa, waana mid xor u ah in uu ku raaxaysto wanaagga nolasha oo ah wax la cuno, ama la cabo, ama la xirto, ama la dhegaysto, waxaana shardi ah in uuna ku dhicin xumaan dhib u keenta isaga ama cid kale, kana tallaabin xayndaabka sharciga.

Diintaydu waxay xuduud u yeelayaa xorriyadda, mana fasaxayso in uu qofku qof kale ku xadgudbo, iyo

in uu qofku sameeyo wixii uu doono oo macaanyaalka la diiday ah taasoo duminaysa/baabi.inaysa xoolihiisa, liibaantiisa iyo Bili Aadannimadiisa.

Hadii aad fiiriso kuwa wax waliba nafsadooda kusii daayey iyaga oo dhahaya xorriyad waaye, oo siiyey naftooda wax waliba oo ay jeceshahay iyadoona wax celinayaa aanu jirin diin iyo caqli toona kuwaas waxa aad arkaysaa in ay ku noolyihiin hoosayn liidnaasho, iyo ciriiri midka ugu daran, qaarkood waad arkaysaa iyaga oo isdilaya iyaga oo jecel in ay ka takhalusaan naftooda wal-wal dartii.

Diinkaygu waxa uu ibarayaa aadaabta mida ugu saraysa xaga cuntada, cabida, hurdada, iyo dhaxgalka dadka intaba.

Diintayda ayaa i baraysa inaan samo fallo marka aan wax iibsanayo ama gadayo, iyo marka aan raadsanayo xuquuqda, waxay ibaraysaa u dul qaadashada kuwa aan isku khilaafsannahay diinta, ma dulminayo mana xumaynayo, waxaana u rajaynayaa in uu hanuunku gaaro iyaga.

Taariikhda muslimiintu waxa ay ka marag kacaysaa arrinkaas oo ah udul-qaadashada kuwa aan muslimiinta ahayn dul-qaad kaasoo aan lagu aqoon ummad ka horraysay ummadan islaamka, muslimiintu

waxay la noolaadeen dad ay diimahoodu kala duwanyihiin, kuwaasoo muslimiintu maamulayeen, waxayna ahaayeen kuwo dadkaas oo dhan wanaajiya oo ula dhaqma si bani aadamnimo kujirto sida ugu fiican ee dad iskula dhaqmaan.

Iskusoo duuduuboo Islaamku waxa uu ibaray aadaabta middeeda yaryar, iyo habdhaqanka kiisa ugu wanaagsan, iyo akhlaaqda wanaagsan oo ah wax ay naftaydu nadiif ku noqonayso noloshaydu, oo farxadayduna ku dhamaystirmayso, Waxayna iga reebtay wax waliba oo noloshayda dhibaya, oo dhibaya habka bulshannimo, ama nafta, caqliga, xoolaha, iyo sharafka.

Kolba sida aan u qaato aadaabtaas iyo waanadaas ayey u waynaanaysaa liibaantaydu, hadba intaan ku gabood falo ama aan ku xad gudbo wax ka mid ah aadaabta Islaamka ayey liibaantaydu dhinmaysaa.

Taasi kama dhigna: in aan ahay mid aan qaldamin, hase yeeshee diintayda ayaa ilaalisay abuurkayga bin aadannimo iyo taag taydaba, mar marka qaar waxa iga dhacaya qalad, gabood fal, iyo xad gudub, sidaa darteed Alle waxa uu ii furay albaabka soo laabashada iyo dambi dhaaf dalabka, Tawbada xaggiisa loo soo laabto waxa ay tirtirtaa gabood falka iga dhacay, waxa

ayna sare u qaaddaa maqaamka aan Alle agtiisa ku leeyahay.

Dhammaan dhaqanka islaamku baahinayo oo ah caqiidada qalbiga salkeeda yahay, akhlaaqda, aadaabta iyo mucaamaladada dadka ka dhaxaysa, waxay ku salaysantahay oo asal u.ah Qur'aanka kariimka ah iyo sunnada rasuulka ee dahiran.

Ugu dambayn waxa aan si go'aan le uleeyahay: haddii uu ruux waliba meeshuu doonaba hajoogee Il caddaaladeed kufiiriyo xaqnimada diinta islaamka, uma suurta gasheen inuu islaamo oo diinta islaamka qaato uun maahane, hase yeeshee dhibaatadu waxa ay tahay in diinka islaamka laga faafiyey been, ama dhaqamada dadka qaar oo sheeganaya islaamka isla markaana aan ugu dhaqmayn sida uu yahay.

Haddii uu ruux fiiriyo dhab ahaanta diinta islaamka sida ay tahay, ama uu ufiirsado dhaqanka muslimiinta dhab ugu dhaqmaya diintooda islaamka,marnaba maka war-wareegeen in uu aqbalo ama uu soo galo. Waxaana u caddaanaya in uu islaamku yahay mid dadka ugu yeeraya liibaantooda. amni iyo nabad gelyo in la ifiyo iyo in lafaafiyo caddaalad iyo sama fal.

Khaladaadka ay sameeyaan dadka sheegta Islaamka qaar ka mid ah ha badnaadeen ama ha yaraadeene uma

bannaana sinnaba in looga qiyaas qaato diinta Islaamka, ama lagu ceebeeyo ee waxaas diintu way ka hufan tahay kana bari tahay. Wax waliba oo ka yimaada khaladaadkaas waxa xambaaraya qofka sameynaya, sababtoo ah Islaamku ma farin arrintaas, iskaba daaye waa uu reebay, wuu ku canaantay qofkii layimaada.

intaa kadib caddaaladdu waxa ay keenaysaa in la fiiriyo kuwa si dhab ah ugu istaagay diinta iyo kuwa fuliya waxyaabaha uu Alle faray naftooda iyo dadka kale intaba arrinkaasi waxa uu ka buuxinayaa qalbiyadooda waynaan iyo deganaan diintan iyo dadkiisaba, Islaamku kama tegin wax wayn iyo wax yar oo hanoonin iyo dhisitaanka Akhlaaqeed ah ee waa uu ku boorriyey, wax xun iyo wax fiicanna kama tegine wuu ka digay, jidkeedana waa uu ka leexiyey dadka.

Sidaa darteed ayay noqdeen kuwa diinta wayneeya, ee ooga wanaagga diinta islaamka kuwa ugu liibaanta badan, ee kusugan darajada ugu sarraysa ee Edebta nafta ah, iyo ku tarbiyaynta nafta dhaqanka wanaagsan iyo akhlaaqda wanaagsan, arrintaas waxa marqaati uga ah mid dhow iyo mid fogba, mid raacsan iyo mid khilaafsanba.

Dhinaca kale haddii la fiiriyo keliya xaalka muslimiinta ku xadgudba diintooda, kana leexday wadada toosan caddaalad maaha taasi iskaba daa'e waa dulmigii laftirkiisa.

Ugu dambayn tani waa dhawaaq iyo yabooh loo wado ruux kasta oo aan muslim ahayn in uu ku dadaalo barashada diintan islaamka ah iyo in uu soo galo.

Waxaa laga rabaa ruuxa doonaya in uu soo galo diinta Islaamka in uu qiro Alle xaq lagu caabudo in uusan jirin Alle maahee Nabi Muxammedna uu yahay Rasuul Alle soo diray, iyo in uu ka barto diinta islaamka waxa uu ku ogaanayo wixii uu Alle ku waajibiyey, Mar waliba oo uu kordho barashada uu baranayo diinta iyo ku dhaqankeeda waxa badanaya liibaantiisa waxaana sare maraya darajada uu ku leeyahay Alle agtiisa.

❋❋❋

so231v1.0 - 18/05/2026

جمعية خدمة المحتوى
الإسلامي باللغات